# Cunto bixin

BADQABKA CUNTADA INTA LAGU JIRO DIYAARINTA, QAADIDDA, IYO ADEEGGA

## Shatiyeynta

Cunto bixinta waxaa loola jeedaa cunto loo diyaarshay adeegga heshiiska munaasabad sida soo dhawayn, xaflad, marti qaad qado, shir, xaflad dabaal deg, ama bandhig ganacsi. Dhammaan adeegyada cuntada ee ka shaqeeya Minnesota waa inay ku shaqeeyaan qaab waafaqsan xeerka cuntada ee Minnesota iyo xeerarka kale, sida aagaynta, dhismaha iyo khamriga.

Goobaha cuntada iyo cabitaannada ee gudaha Minnesota ee ruqsada ka haysta wakaaladaha kaladuwan ee Minnesota. Dookhyada xarumaha iyo shaqada goobta ayaa go'aanmiyo wakaalada masuulka ah dib u eegista qorshaha iyo ruqsadaynta. Si aad u ogaato wakaalada masuulka ah, fiiri webseedka Rugsadaynta (Licensing). La xariir wakaalada ku haboon si aad ugala hadasho dib u eegista qorshaha iyo shuruudaha ruqsadaynta, aadna u hesho codsiyada.

## Shahaadada

Xeerka cuntada ee Minnesota ayaa ka doonaaya Hal Maamule oo difaaca cuntada ah ee Minnesota ruqsad ka haysta (CFPM) inta badan goobaha cuntada. Si aan xog badan uga ogaano shuruudaha, tababarka iyo shahaadada CFPM ka fiiri webseedka Maareeyaha Sharciyaysan ee Fayo-qabka Cuntada Minnesota Certified Food Protection Manager (CFPM).

## Dookhyada, qulqulka cuntada iyo qalabka

Dookhyada iyo habka cuntada ayaa go'aaminaaya nooca qalabka aad u baahan tahay inaad haysato. Isbadallada lagu sameeyo dookhyada ayaa saamayn ku yeelan kara shuruudaha qalabka laga doonaayo. Hanaanka cuntadu marayso waxaa kamid ah dhammaan talaabooyinka helitaanka, kaydinta, diyaarinta iyo bixinta.

Adeegso qasacyada heerka cuntada ee awooda inay cuntada ku ilaaliyaan heerkul amaan ah iyo xaalad nadaafad leh.

## Ilaalinta badqabka cuntada

Xarunta cuntada ee qaybinaysa cuntada ayaa masuul ka ah ilaalinta maamulka iyo xaqiijinta badqabka cuntada laga bilaabo diyaarinteeda ilaa looga geeyo dadka cunaaya. Ilaali cuntada inta lagu jiro kaydinta, diyaarinta, gaadiidka, iyo bixinta cuntada si looga hortago isku sumoobida cuntada iyo sunta boorka, cayayaanka ama ilaha kale. Ilaalinta nadaafada qalabka iyo gaariyaasha.

Marka cuntada loo diyaarsho munaasabad cunto, shanta arimood ee soo scoda ayaa kordhinaaya khatarta xanuun cuntada ka dilaaca:

- Caafimaadka iyo nadaafada shaqaalaha oo liita
- Heelkulada cunta karinta iyo waqtiyada oon sax ahayn
- Cunto laga helo ilo aan badbaado lahayn
- Heerkulka haynta ee kulaylka iyo qaboowga iyo waqtiyada oon sax ahayn
- Isdhaafka sunta iyo qalab sumaysan

**Hennepin County Environmental Health**
479 Prairie Center Drive Eden Prairie, MN 55344
612-543-5200 | www.hennepin.us/envhealth
Catering_Somali_HC_6-25
Content courtesy of the Minnesota Department of Health

Shan habraacyada maaraynta ah oo waxtar u leh yaraynta khatarta inuu dilaaca cudur ka dhasha cuntada:

- Ka saar shaqada shaqaalaha jiran, si fiican faraha haloo dhaqo, kana hortag in faraha toos loogu taabto cunto u diyaarsan in la cuno.
- Ku kari cuntooyinka ceeriinka ah ee xayawaanka heerkulada iyo waqtiyada uu qasabka ka dhigaayo xeerka cuntada ee Minnesota.
- Xaqiiji in dhammaan cuntadu ay ka timid cunto bixiyaal aqoonsi leh, laguna helay ayagoo leh heerkulka loo baahan yahay iyo xaalad fayoobi leh.
- Ka fogee cuntada aaga heerkulka daran (inta u dhaxaysa 41°F iyo 135°F).
- Si sax ah u kaydi cuntada oo dhaq, biyo raaci, oo jeermis dile mari meelaha cuntadu taabanayso.

Webseedka Xaashiyada Xogta ee Ganacsiga Cuntada (Food Business Fact Sheets) ayaad ka helaysaa xog dheeraad ah oo ku saabsan shuruudaha xeerka cuntada ee Minnestosa, sida nadaafada shaqsiga ah ee shaqaalaha, shuruudaha heerkulka iyo waqtiga ee cuntada, ka iibinta ama siinta cuntada deegaanka lagu beeray xarumaha cuntada, xakamaynta waqtiga qaboojinta/heerkulka ee badqabka cuntada, iyo shaqada badqabka ee xarunta cuntada.

# Su`aalaha Inta badan la Isweydiiyo

## Wax ka badan hal ganacsi ma ka shaqayn karaa isku meel?

Haa. Xarun kasta oo loo adeegsado adeegyada cunto bixinta waa inay buuxisaa heerarka ku haboon dookhyada cuntada iyo xajmiga cuntada lagu diyaarin karo jikadaas. Maamule kasta oo maamula aag wadaag ah waa inuu haystaa ruqsad uu goobtaas ku maamulo.

## Dadka cuntada diyaarsha ma karin karaan oo ma ku diyaarin karaa cuntada goobta ay munaasabadaha heshiiska la galay ka dhacayaan?

Haa. Cuntada waa lagu karin karaa waana lagu diyaarin karaa goobta marka talaabooyinka xakamaynta la raaco si loo yareeyo khatarta cudur cuntada ka dilaaca. Ganacsi kasta oo cunto diyaariya waa mid gaar ah, maamulayaashuna waa inay ka doodaan dookhyada iyo nidaamka diyaarinta cuntada, xajmiga iyo waqtiga, qalabka, nadaafada iyo sifaynta, iyo maacuunta ayna kala hadlaan kormeerahooda ama wakaalada ku haboon si loo go'aansho shuruudaha qaaska ah.

## Ma jiraan shuruudo dheeraad ah oo cunto diyaariye u baahan yahay si uu uga fiirsado?

Haa. Cunto diyaariyaashu waa inay buuxshaan shuruudaha badqabka ayna ku jiraan isha biyaha, bixinta qashinka, iyo maacuunta.

# Macluumaadka

Minnesota Certified Food Protection Manager (CFPM) (www.health.state.mn.us/communities/environment/food/cfpm/index.html)

Caterer’s Permit with Alcohol, Minnesota Department of Public Safety (https://mn.gov/elicense/a-z/?id=1083-231125#/list/appId//filterType//filterValue//page/1/sort//order/)C

**Hennepin County Environmental Health**
479 Prairie Center Drive Eden Prairie, MN 55344
612-543-5200 | www.hennepin.us/envhealth
Catering_Somali_HC_6-25
Content courtesy of the Minnesota Department of Health